

# Waxaad Ka Ilaalisaa Qoyskaaga Liidhka Gurigaaga






EPA Hay'ada Ilaalinta Deegaanka Maraykanka

Gudida Badbaadada Alaabta Macmiilka Maraykanka

Waaxda Maraykanka ee Hormarka Guryaynta iyo Magaalada


Maarso 2021

# Ma Waxaad Qorshaynaysaa Inaad Iibsato ama Kiraysato Guri La Dhisay Kahor 1978?

Miyaad og tahay in guriyo badan oo la dhisay wixii ka horeeyay 1978 ay leeyihiin **ranjiga liidhka leh**? Liidhka ranjiga, qurubyada soo dhacay, iyo dhasku waxaa leeyihiin sun waxyeelo leh oo caafimaadka u daran.

**Akhri buug yarahan oo dhan si aad u ogaato:**

- Sida liidhku uu u geli karo jidhka
- Sida uu liidhku u saamayn karo caafimaadka
- Waxa aad samayn karto si aad u ilaaliso qoyskaaga
- Halka aad ka heleyso macluumaad dheeraad ah

**Kahor inta aanad kiraysan ama iibsan guri la dhisay wixii ka horeeyay 1978, sharciga federalku waxa uu dhigayaa:**

- In cida iibinaysaa ay sheegto macluumaadka ranjiga liidhka leh ama waxyeelada ranjiga uu leeyahay kahor inta aanu iibin guriga.
- Heshiisyada iibka gurigaga shirkada waa inay la socdaan digniinta rasmiga ah ee ku saabsan ranjiga liidhka. Cida iibsanaysaa waxa ay haysataa 10 maalmood inuu ka eego liidhka.
- Mulkiilaha inuu sheego macluumaadka ranjiga liidhka leh ama waxyeelada ranjiga uu leeyahay kahor inta aana dhaqan gelin kirada gurigu. Kirada waa inay ku jirtaa digniinta rasmiga ah ee ku saabsan ranjiga liidhka.

**Hadii la samaynayo mashaariic ah dayactir, hagaajin, ama ranjiyayn (RRP) ee gurigaaga la dhisey wixii ka horeeyay 1978:**

- Akhri waraaqaha EPA, Tilmaamaha Xaqiijinta Badbaadada Liidhka ee Xuquuqda Dayactirka (Lead-Safe Certified Guide to Renovate Right), si aad wax uga ogaato nidaamyada shaqada badbaadada liidhka ee qandaraaslaha oo looga baahan yahay inuu raaco marka uu ka shaqaynayo gurigaaga (eeg bogga 12).



# Talaabooyinka Fudud ee Aad Qoyskaaga Uga Ilaalin Karto Waxyeelada Liidhka

**Hadii aad u aragto in gurigaaga uu marsan yahay ranjiga liidhka leh:**

- Ha isku dayin inaad adigu ka baabi'iso ranjiga.
- Waxa aad mar kasta ilaalisaa dusha sare ee ranjiga si markaa aad u yarayso in aanu waxyeeloobin.
- Gurigaaga halaga baaro suntan liidhka. Ka raadi bare shatiyeysan ama qiimeeyaha khatarta epa.gov/lead.
- Waxa aad kala hadashaa mulkiilaha gurigaaga sidii loo hagaajin lagaa in aanu ranjigu soo daadan ama qurubyo ayna soo dhicin.
- Waxa aad si joogto ah u nadiifisaa dhulka, daaqadaha, iyo meelaha la taaban karo.
- Waxa aad ka taxadirtaa inuu idin soo gaadho dhaska marka aad tirtirayso.
- Marka la tirtirayo, dayactiryo, ama la ranjiyaynayo, waxa aad qabsataa EPA- ama shirkad u tirtirta si Amaan ah Liidhka oo gobolku ansixiyay.
- Kahor inta aanad iibsan, kiraysan, ama dayactiran guriga, waxa aad ka eegtaa ranjiga leh liidhka.
- Waxa aad kala tashataa daryeelka caafimaad bixiyahaaga wixii ku saabsan in laga baadho carruurtaada liidhka. Dhakhtarkaaga carruurta ayaa ka baadhi kara liidhka muunada dhiiga.
- Waxa aad maydhaa gacmaha, masaasada, kadaabada, iyo alaabta ay ku ciyaaraan carruurtaadu badanaa.
- Waxa aad xaqiijisaa in aad cuntid cunto caafimaad leh, duxdeedu yar tahay oo leh bir badan, kaalshiyeem, iyo fiitaamiin C.
- Waxa aad ka saartaa kabaha ama waxa aad ka masaxdaa ciida kabaha kahor inta aanu guriga lasoo galin.

# Liidhku Waxa uu Jidhka u Galaa Qaabab Badan

**Dadka Waawayn iyo Carruurta waxa jidhkooda gala liidhku hadii ay:**

- Neefsadaan dhaska (gaar ahaan inta lagu jiro hawlaha sida dayactirka, hagaajinta, ama ranjiyaynta taas oo markaa lagu waxyeelayo ranjiga sare).
- Liqida dhaska liidhka leh kaas oo markaa ku jira cuntada, cunto lagu diyaariyay meel banaan ah, iyo meelo kale.
- In la cuno qurubyada ranjiga ama ciida ee leh liidhku.

**Liidhku waxa uu khatar ku yahay gaar ahaan carruurta ka yar 6 jirka.**

- Wakhti xaadirkan, maskaxda carruurta iyo nidaamka neerfuhu waxa ay u nugul yihiin waxyeelada liidhka.
- Jidhka koraya ee carruurta ayaa markaa liqa liidhka.
- Carruurta iyo dhallaanka waxa ay badanaa geliyaan gacmahooda iyo alaabta kale afkooda. Alaabaadkan waxa dhici karta inuu saaran yahay dhaska liidhku.



**Dumarka gaadhay da'da dhalmada waa inay yaqaanaan in liidhku uu khatar ku yahay uur jiifka.**


- Dumarka liidhka sare uu ku jira dhiigooda kahor ama inta ay uur leeyihiin waxa ay khatar ugu jiraan inay qaadsiiyaan uur jiifka luudhka oo uu u dhax maro madheerta inta uu ilmuhu korayo.

## Saamaynta Caafimaadka ee Liidhka

**Liidhku waxa uu u saameeyaa jidhka qaabab kala duwan.** Waxaa muhiim ah in la ogaado in xataa liidhka yar uu carruurta u keeni karo waxyeelo aad u daran.

**Carruurta, in uu liidhku soo gaadhaa waxa ay keeni kartaa:**

- Waxyeelo nidaamka neerfaha iyo kalyaha ah
- Laxaad la'aan waxbarasho, khalkhalka soo jeedka, iyo hoos u dhac garaadka ah
- Mushkilad hadalka, luuqada, iyo habdhaqanka ah
- Isku xidhnaanta muraqaha oo liidata
- Hoos u dhac murqaha iyo lafaha ah
- Waxyeelo maqalka ah




In kastoo soo gaadhis yar oo liidhka ah ay wax iska caadi ah ay tahay, soo gaadhida liidhka badan waxa uu ku yeelan karaa saamayn aad u daran carruurta, oo ay ku jiraan suuxdin, miyir beel, iyo mararka qaar, dhimasho.

Inkasta oo carruurtu ay si gaar ah ugu nuqul yihiin liidhka badan, waxa uu waxyeelo u keeni karaa dadka waawayn sidoo kale.

**Dadka waawayn, in uu liidhku soo gaadhaa waxa ay keeni kartaa:**

- Waxyeelo korniinka ilmaha uur jiifka ah
- Waxa uu kordhiyaa khatarta ah inuu dhiikar yimaado wakhtiga uurka
- Mushkiladaha dhalmada (raga iyo dumarka)
- Dhiigkar
- Mushkilad dheefshiidka ah
- Khalkhal neerfaha ah
- Mushkilado xasuusta iyo soo jeedka ah
- Xanuun muraqaha iyo laalaabatooyinka jirka ah

## Waxa Aad Qoyskaaga Ka Baartaa Liidhka

**Waxa aad baadhaa gurigaaga iyo carruurtaada hadii aad ka shakido in uu liidh leeyahay gurigaagu.**

Heerka liidhka dhiiga carruurta waxaa ay u kordhi kartaa si wayn 6 ilaa 12 bilood da'da ah, oo waxa ay ugu badan tahay da'da 18 ilaa 24 bilood.

Waxa aad kala tashataa dhakhtarkaaga wixii shaybaadhka carruurtaada ku saabsan. Shaybaadhka dhiiga muunada ah waxa lagu ogaan karaa liidhka. Shaybaadhka liidhka dhiiga waxa caadiyan lagula taliyaa:

- Caruurta 1 ilaa 2 jirka ah
- Caruurta ama xubnaha kale ee qoyska ee uu saameeyey liidhka heerka sare
- Caruurta lagu shaybaadhay qorshaha shaybaadhka gobolka ama deegaanka

**Dhakhtarkaaga ayaa kuu sharixi kara waxa ay ka dhigan tahay natiijada shaybaadhka iyo hadii shaybaadhka loo baahan yahay.**

## Halkee Laga Helaa Ranjiga Liidhka

Guud ahaan, hadba sidii uu gurigaaga ama xarumaha daryeelka caruurtu uu qadiimi u yahay, ayay u badan tahay in uu marsan yahay ranjiga liidhku.[1]

**Guryo badan, oo ay ku jiraan guryaha gaarka ah, kuwa kaalmada federalka ah, guryaha uu federalku leeyahay, iyo xarumo badan caruurta lagu daryeelo oo la dhisay wixii ka horeeyay 1978 waxa ay marsan yihiin ranjiga liidhka leh.** 1978, dawlada federalku waxa ay mamnuucday isticmaalka alaabaadka macaamiisha ee uu marsan yahay ranjiga liidhku.[2]

Waxa aad ka ogaataa sida loo ogaado hadii ranjiga uu leeyahay liidh boga 7.

**Liidhka waxaa laga heli karaa:**

- Guryaha iyo xarumaha daryeelka caruurta ee magaada, miyiga, ama meelaha ka baxsan magaalada.
- Guryaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa dadweynaha iyo guryaha dabaqa ah.
- Digaarada banaanka iyo guraha ee guriga, iyo.
- Ciida ku xeeran guriga. (Ciida waxa uu uga iman karaa liidhku ranjiga banaanka iyo meelo kale, sida isticmaalka hore ee shidaalka gaadiidka ee liidhka lagu daray.)

Waxa aad macluumaad dheeraad ah ka ogaataa epa.gov/lead.

[1] "Ranjiga liidhka leh" waxa wakhti xaadirkan ay ku sheegtaa dawlada federalku inuu yahay heer ka badan ama le'eg 1.0 miligiraam sentimeetir iskuweerkiiba (mg/cm2), ama wax ka badan miisaanka 0.5%.

[2] "Ranjiga leh liidhka" waxaa ay ku sheegtaa dawlada federalku inuu yahay liidhka ranjiga isaga oo cusub ku qalalay oo ka badan 90 qaybood milyankiiba (ppm) miisaanka ah.

# Ogaanshaha Ranjiga Liidhka Leh iyo Waxyeelada Ranjiga Liidhka Leh

**Marka uu duugoobo ranjiga liidhka leh (dhilmo, soo googo'o, dil dilaaco, ama waxyeeloobo)** waa sun oo waxa loo baahan yahay in si dhakhso ah wax looga qabto. **Ranjiga liidhka leh** waxa sidoo kale laga heli karaa meelaha dusha ah taas oo markaa carruurta ay ruugi karaan ama kaas oo markaa inta uu duuboobmo dildilaaci kara, sida:

- Daaqada iyo moorinta daaqada
- Albaabada iyo fireemka albaabka
- Jaran jarada, wadiiqada, iyo barandada

Ranjiga liidhka leh caadiyan waxyeelo malaha hadii ay xaaladiisu wanaagsan tahay oo hadii aan la tataabanin ama aan la xoqin meelaha daaqada ah.

Dhaska liidhka waxa uu samaysmi karaa markii ranjiga liidhka leh la xoqo, ciid la mariyo ama la kululeeyo. Dhaska liidhka ayaa sidoo kale samaysmi kara marka bamka ama burushka wax lagu ranjiyaynayo la isku dhufto. Qurubyada ranjiga liidhka leh iyo dhaska waxa uu gaadhi karaa meelaha dusha iyo shayada ay dadku taaban karaan. Dhaska liidhka waxa uu ku dagaa oo uu dib u geli karaa hawada marka guriga la xaaqaayo ama la qalajinaayo, ama marka dadku ay dul socdaan.

EPA waxay wakhti xaadirkan ku sheegtaa heerka liidhka ee dhaska wayxeelada leh:

- 10 micrograms iskuwareeg fuudkiiba (µg/ft2) iyo wixii ka sareeya ee dhulka, oo ay ku jirto rooga dhulka
- 100 µg/ft2iyo wixii ka sareeya daaqada gudaha miisha ay ka xidhanto

**Liidhka ciida** waxa uu keeni karaa waxyeelo marka ay carruurtu ku ciyaarto ciida ama marka ay dadku usoo qaataan ciida guriga inta ay kabaha usoo raacdo. EPA waxay wakhti xaadirkan ku sheegtaa heerka liidhka ee ciida wayxeelada leh:

- 400 qaybood milyankiiba (ppm) iyo wixii ka sareeya ee aaga ciyaarta ee ciida leh
- 1,200 ppm (celcelis ahaan) iyo wixii ka sareeya ee ciida ee inta hadhsan ee barxada

**Xasuusnaw, liidhka ranjiga soo googo'ay - oo aad markaa arki karto- iyo dhaska liidhka-oo aanad arki karin-labaduba waxyeelo ayay leeyihiin.**

Qaabka kaliya ee aad ku ogaan karto hadii ranjiga, ama ciida ay leedahay waxyeelo waa inaad baarto. Bogga xiga waxa uu sharaxaa sida aad taas u samayn karto.

## Waxa aad Ka Eegtaa Gurigaaga Liidhka

Waxa aad uga baadhi kartaa gurigaaga liidhka dhawr qaab:

- **Baadhitaanka** ranjiga liidhka leh waxa uu kuu sheegi karaa hadii gurigaaga lagu ranjiyeeyay ranjiga liidhka iyo halka uu ku yaal. Kuuma sheegeyso hadii gurigaaga uu wakhti xaadirkan leeyahay sun. Xirfadle la tobobaray oo markaa shahaado haysta, oo loo yaqaan baadhaha ranjiga liidhka leh, ayaa samayn doono baadhitaanka ranjiga isaga oo adeegsanaya qaabab, sida:
  - Mishiinka raajiga laydhka foloorantiga ah (XRF)
  - Baadhitaanka shaybaadhka ee muunada ranjiga



- Qiimaynta khatartu waxa ay kuu sheegi doontaa hadii gurigaagu uu wakhti xaadirkan leeyahay waxyeelo liidh oo dhanka ranjiga ah, dhas ama ciida ku jirta. Waxa ay sidoo kale kuu sheegeysaa talaabada aad qaadayso si aad uga fal-celiso wixii waxyeelo ah. Xirfadle la tobobaray oo shahaado haysta, oo loo yaqaan qiimeeyaya khatarta, ayaa:
  - Qaadi doona muunada ee wixii duugoobay ee albaabka, daaqadaha, dhulka, jaran jarada, iyo gidaarka ah
  - Muunada dhaska ee ranjiga dhulka sare u dhaw iyo muunada ciida ee dhulka
  - Waxa ay tahay inaad hesho shaybaadh ranjiga ah, iyo muunada ciida
- Isku-darka baadhitaanka iyo qiimaynta khatarta waxa ay kuu sheegeysaa hadii gurigaaga uu leeyahay ranji liidh kwg iyo hadii gurigaaga uu leeyahay waxyeelo liidh, iyo halka ay labaduba ku yaalaan.

Waxa aad xaqiijisaa inaad akhrido warbixinta marka la dhameeyo baadhitaanka ama qiimaynta khatarta, oo waxa aad waydiisaa wixii aanad fahmin.

## Ka Baarida Gurigaaga ee Liidhka, sii socda

Marka aad u diyaar garoobayso shaqada dayactirka, hagaajinta, ama rajiyaynta ee guriga la dhisay wixii ka horeeyay 1978, dayactiraha Shahaada ku Haysta Amaanka Liidhka (eeg boga 12) ayaa:

- Qaadi kara muunada qurubka ranjiga si markaa loo ogaado hadii ranjiga aaga loo qorsheeyay dayactirka uu liidh leeyahay oo waxa uu u diri doonaa shaybaadh ay aqoonsan tahay EPA si uu markaa u qiimeeyo. Guryaha qaata kaalmada federalka, qofka muunada qaadayaa waa inuu ahaadaa baadhe ama qiimeeye khatar ah oo shahaado ku haysta ranjiga liidhka
- Waxa aad isticmaashaa bushqada baadhitaanka EPA si aad u ogaato in aanu jirin ranji liidh leh (laakiin loogu talagalay guryaha aan qaadan kaalmada federalka)
- Waxa aad u qaadataa in ranjiga liidhka uu jiro oo markaa waxa aad ka taxadirtaa shaqada

Waxaa jira barnaamijyo gobolka iyo federalka ah oo markaa lagu xaqiijinayo in baadhitaanka loo sameeyo si amaan ah, lagu kalsoon yahay, oo wax ku ool ah. Waxa aad la xidhiidhaa hay'ada deegaanka ama gobolka si aad u hesho wixii macluumaad ah, booqo epa.gov/lead, ama la hadal **1-800-424-LEAD (5323)** si aad u eego liiska cida lala xidhiidhayo ee deegaankaaga.[3]

[3] Dadka hadalka ama maqalku ku adag yahay waxa ay ka heli karaan lambarka TTY iyada oo markaa kala hadlaya Adeegyada Gudbinta Federalka 1-800-877-8339.

## Waxa Aad Samayn Karto Si Aad U Ilaaliso Qoyskaaga

**Hadii aad ka shakido in gurigaaga uu leeyahay waxyeelo ranjiga liidhk ah, waxa aad qaadi kartaa tallaaboyin degdeg ah si aad u yarayso khatarta qoyskaaga:**

- Hadii aad ku jirto kiro, waxa aad ogaysiisaa mulkiilaha guriga wixii soo go'a ama soo dhaca ee ranjiga ah.
- Waxa aad nadiifisaa meelaha ranjiyaysan oo yayna yeelan dhas. Waxa aad nadiifisaa dhulka, daaqadaha, moorinta daaqadaha, iyo meelaha kale todobaad kasta. Waxa aad isticmaashaa masaxaad ama isboonji iyo biyo diiran iyo saabuunta guud ee wax lagu nadiifiyo. (Xasuusnaw: weligaa ha isku darin ammonia iyo waxyaabaha jaafeesha aha maadaama oo ay samayn karaan gaas khatar ah.)
- Waxa aad nadiifisaa ranjiga soo daatay isla markaba adiga oo aan markaa dhas abuuraynin.
- Si fiican u nadiifi isboonjiga iyo masaxaada marka aad ku nadiifinaysid meelaha uskaga leh ama aaga dhaska leh, oo waxa ugu xoqdaa hore iyo dib.
- Waxa aad maydhaa gacmahaaga iyo gacmaha caruurtaada badanaa, gaar ahaan kahor inta aanad cunin cunto iyo kadib marka aad hurdo isku diyaarinaysaan iyo wakhtiga hurdada.
- Waxa aad si joogto ah u nadiifisaa meelaha lagu ciyaaro. Waxa aad maydhaa masaasada, kadaabada, alaabta lagu ciyaaro, iyo xayawaanka caruusada ah.
- Waxa aad ka ilaalisaa inay carruurtu calaaliyaan ama afka la galaan daaqadaha caagooda ama meelaha kale ah ee la ranjiyeeyey, ama inay cunaan ciida.
- Marka la tirtirayo, dayactiryo, ama la ranjiyaynayo, waxa aad qabsataa EPA- ama shirkad tirtirta si Amaan ah Liidhka oo gobolku Ansixiyay(ee boga 12).
- Nadiifi oo waxa aad iska saartaa kabaha inta aanad soo gelin guriga si aad markaa uga hortagto inay kusoo raacdo ciidu.
- Waxa aad xaqiijisaa inay carruurtu cunaan cunto nafaqo leh, duxdu ku yar tahay, leh bir badan, iyo kaalshiyeem, sida saladhka iyo waxa xoolaha laga sameeyay. Carruurta nafaqada wanaagsan cunaa waxa ay nuugaan liidh yar.

## Yaraynta Waxyeelada Liidhka

**Khalkhalinta ranjiga liidhka leh ama inaad si aan munaasab ahayn u tirtirtaa waxa ay kordhisaa inay qoyskaaga ku faafto waxyeeladu oo xataa dhas badan oo liidhka ahi uu gurigaaga saameeyo.**



- Marka laga tago nadaafada maalin kasta iyo nafaqada wanaagsan, waxa aad si kumeel gaadh ah u yarayn kartaa waxyeelada ranjiga adiga oo markaa qaada tallaabooyin, sida inaad dayactirto ranjiga waxyeeloobay ee meelaha muuqda iyo inaad ka beerto doog aaga ciida ee waxyeeloobay. Tallaabooyinkan maaha xal waara oo waxa ay u baahan doonaan in si joogto ah loola socdo.
- Waxa aad yarayn kartaa soo gaadhitaanka liidhka ee dadka marka la dayactirayo, hagaajinayo ama ay ranjiyaynayaan qandaraasle shahaado ka haysta EPA ama gobolka kaas oo markaa lagu tobobaray isticmaalka nidaamka badbaado ee gobolka. Hadii aad laftaadu shaqadaas qabanayso, waxa aad ogaataa sida aad u isticmaali karto nidaamka badbaadada shaqada ee gurigaaga.
- Si aad sunta uga saarto si rasmi ah, waa inaad shaqaalaysiisaa qandaraasle yareeya khatarta liidhka oo shahaado haysta. Qaabka Yaraynta (ama meesha uga saarida khatarta si rasmi ah) waxaa kamid ah meesha ka saarida, moorinta, ama in lagu xidho waxyaabo gaar ah ranjiga liidhka leh. Inaad ku dul ranjiyayso ranjiga waxyeelada leh mid caadi ah maaha qaab loogu xakamayn karo si rasmi ah.

**Mar kasta waxa aad isticmaashaa qandaraasle shahaaho haysta kaas oo markaa loo tobobaray sidii uu markaa uga shaqayn lahaa liidhka si amaan ah.**

- Shaqaalaysii Shirkad Badbaadada Liidhka Shahaado ku Haysata (eeg boga 12) si ay u samayso mashaariicda dayactirka, hagaajinta, ama ranjiyaynta (RRP) taas oo markaa khalkhalinaya ranjiyaynta dusha.
- Si aad sunta ugu saxdo si rasmi ah, waa inaad qandaraaslaha aad shaqaalaysiisatay uu yareeyaa khatarta liidhka oo shahaado haysta. Tani waxa ay xaqiijin doontaa in qandaraaslaha uu garan karo sida uu si amaan ah ugu shaqayn karo oo uu markaa u helo agabka nadaafa ee saxda ah ee dhamayskaritan.

Qandaraaslaha shahaadada haystaa waxaa uu haystaa shaqaale xirfadle ah oo markaa si taxadir ah u raacaya shuruucda amniga ee ay dejiyeen gobolka ama dawlada federalku.

## Yaraynta Waxyeelada Liidhka, sii socda

**Hadii gurigaaga laga nadiifiyay lead** ama hadii gurigaagu uu qaato kaalmo federal ah, marka shaqada la dhameeyo., hawlaha ka saarida dhaska waa in qabtaa ilaa inta tijaabada nadaafadu muujinayso in heerka ugu yar ee dhasku uu jiro kaas oo u baahan heerarka soo socda:

- 10 micrograms isku wareeg fuudhkiiba ($\mu g/ft^2$) dhulka, oo ay ku jiraan dhulka roogaga ah
- 100 $\mu g/ft^2$ dabaadhka daaqada gudaha
- 400 $\mu g/ft^2$ meelaha godan ee daaqa

**Abatements waxaa loogu talo geley inuu gebi ahaanba meesha ka saaro waxyeelada ranjiga.** Laakiin, dhasku waxa uu dib usoo geli karaa meelaha laga saaray.

- U isticmaal faakuyuumka HEPA dhamaan alaabaadka iyo shayada kale ee lagu soo celinayo aaga, si loo yareeyo inuu soo noqdo naska leadku.
- Waxa aad ii joogto ah ugu nadiifi funka, dahaashka daaqada, meelaha godan ee daaqa iyo meelaha kale ee dusha ah maro ama buush iyo nadiifiyaha guud.

Fadlan eeg boga 9 wixii macluumaad dheeraad ah ee talaabooyinka aad qaadi karto si aad u ilaaliso gurigaaga kadib marka abatement lagu sameeyo. Wixii kaalmada helitaanka xirfadle abatement oo shahaado u haysta oo deegaankaaga ah, la hadal gobolka aa hay'ada deegaanka (eeg boga 15 iyo 16), ama booqo visit epa.gov/lead, ama la hadal 1-800-424-LEAD.

# Dayactirka, Hagaajita ama Ranjiyaynta Guri uu Marsan Yahay Ranji Leh Liidhka

**Hadii aad shaqaalaysiisato shirkad markaa kuu qabata mashruuc dayactirta, hagaajinta, ama rajiyaynta (RRP) guriga ama xarunta daryeelka carruurta ah oo la dhisay wixii ka horeeyay 1978 (sida waxbarashada dugsiga kahor iyo xanaanada carruurta), qandaraaslahaagu waa inuu:**




- Noqdaa Shirkad Amaanka Badbaadada U shatiyeysan ee ay ansixisay EPA ama barnaamijka gobolka maamulka EPA
- Isticmaalaa shakhsi u qalma oo si gaar ah loo tobobaray (Hagaajiye Shahaado Amaanka Liidhka Haysta) kaas oo markaa raacaya nidaamka shaqada amaanka liidhka si markaa uu uga hortago sunta liidhka
- Bixiyo waraaqo macluumaadka waxyeelada liidhka EPA, *Tilmaamaha Amaanka Liidhka La Xaqiijiyay ee Tirtirka Saxda ah*

**Qandaraaslaha RRP ee ka shaqaynaya guryaha iyo xarunta daryeelka caruurta la dhisay wixii ka horeeya 1978 waa inuu raacaa nidaamka badbaadada liidhka ee:**

- **Xidhitaanka aaga shaqada:** Aaga waa in la xidhaa si markaa dhaska iyo qurubyadu ayna uga bixin meesha laga shaqaynayo. Calaamad digniin ah waa in lagu dhejiyaa, waana in la isticmaalaa caag ma wixii kale ee alaab ama xabag ah.
  - **Waa in la iska ilaaliyaa qaabka dayactirka ee markaa soo saaraya dhaska sunta liidhka ee badan.** Qaababka qaar ayaa soo saara liidh isticmaalkooda la mamnuucay. Waxa weeye:
  - Danba furan ama tooshka
  - Ciida, burburta, qorshaynta, irbadaha, ama qarxinta iyada oo la adeegsanayo agab xoog badan iyo agabka aan markaa qaban karin oo aan nuugi karin dhaska ka imaada
  - In la isticmaalo qoriga oo ah heerkul ka badan 1100°F
- **In si wanaagsan loo nadiifiyo.** Meesha lagu shaqaynayo waa in maalin kasta la nadiifiyaa. Marka shaqadu dhamaato, aaga waa in la nadiifiyaa iyada oo markaa la isticmaalayo qaabka nadiifinta gaarka ah.
- **In si sax ah loo daadiyo qashinka.** Waxa aad uruurisaa oo aad afka ka xidhaa bacaga dhaska ama marooyinka. Marka aad qaadayso, waxa aad xaqiijisaa in qashinka la xidho si markaa looga hortago inuu kasoo baxaan dhas iyo qurubyo.

Si aad wax badan uga ogaato shuruudaha EPA ee mashaariicda RRP, booqo epa.gov/getleadsafe, ama akhri *Tilmaamaha Xaqiijinta Badbaadada Liidhka ee Ka Saarida Saxda ah.*

# Meelaha Kale ee Liidhku Ka Yimaado

## Liidhka Biyaha La Cabo

Meelaha ugu badan ee liidhku uga yimaado biyaha la cabayo waa beebka iyo qasabadaha liidhka ka samaysan.

Beebabka liidhka waxa ay u badan tahay in laga helo magaalooyinka iyo guryaha la dhisay wixii ka horeeyay 1986.

Waxa aad urin kartaa ama dhadhamin kartaa liidhka ku jira biyaha la cabo.

Si aad u xaqiijiso in liidh uu ku jiro biyaha aad cabayso, waa inaad baartaa biyaha adigoo isticmaalaya shaybaadh.

Waxa aad xasuusataa guryaha qadiimiga ah ee leh ceel u gaar ah waxa sidoo kale ay soo saaraan waxyaabo leh liidh.

## Talaabooyinka Ugu Muhiimsan ee Aad Qaadi Karto Si Aad U ayarayso Liidhka Biyaha La Cabo

- Waxa aad kaliya biyo qabow u isticmaashaa cabida, karinta iyo qasitaanka caanaha carruurta. Xasuuso, in diirintu ayna biyaha ka saarin liidhka.
- Kahor inta aanad cabin, waxa aad waxoogaa biyaha ku furtaa beebka adiga oo qasadaba furaya, ku mayranaya, dharka, ama adigoo ku dhaqaya alaabta.
- Si joogto ah u nadiifi qasabada (oo sidoo kale loo yaqaan aerator).
- Hadii aad isticmaalayso filtare la xaqiijiyay si aad uga saarto liidhka, ha iloobin in aad akhrido tilmaamaha si aad u ogaato goorta aad badali karto khadka. Inaad isticmaashaa filterku kadib marka uu dhaco waxa ay keeni kartaa in waxqabadkiisa meesha ka saarida liidhku ay yaraato.

Waxa aad la xidhiidhaa shirkada biyaha si aad u ogaato hadii beebku uu ku xidhan yahay gurigaaga ee biyaha ee guud (oo loo yaqaan khadka adeega) inuu ka samaysan yahay liidhka. Shirkada biyaha aagaaga waxa ay sidoo kale bixin kartaa macluumaad ku saabsan heerka liidhka ee ku jira beebabka biyaha.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan biyaha la cabayo, fadlan la xidhiidh Khadka Taleefanka Tooska ah ee Amaanka Biyaha La Cabayo ee EPA 1-800-426-4791. Hadii aad qabto wax su'aal ah oo kale oo ku saabsan kahortaga sunta liidka, la hadal 1-800 424-LEAD.*

La hadal waaxda caafimaad deegaanka ama shirkada biyaha si aad u ogaato baadhitaanka biyaha, ama booqo epa.gov/safewater macluumaadka liidhka ku jira biyaha la cabayo ee EPA. Gobolada qaar ama shirakda qaar waxa ay bixiyaan barnaamijyo lagu bixiyo shaybaadhka biyaha ee dadka deegaanka. Waxa aad la xidhiidhaa shirkada gobolla ama deegaanka ee biyaha si aad wax badan uga ogaato.

---

* Dadka hadalka ama maqalku ku adag yahay waxa ay ka heli karaan lambarka TTY iyada oo markaa kala hadlaya Adeegyada Gudbinta Federalka 1-800-877-8339.

## Meelaha Kale ee Uu Ka Yimaado Liidhku, sii socda

- **Tumayaasha biraha** ama warshadaha kale ee liidhka ku sii daaya hawada.
- **Shaqadaada.** Hadii aad ka shaqayso liidh, waxa aad markaa dharkaaga inta uu soo raaco aad keeni kartaa guriga. Maydho ama badalo dharka kadib marka aad timaado guriga. Waxa aad ku maydhaa dharkaaga shaqada meel ka gaar ah dharka qoyska intiisa kale.
- **Waxyaabaha hiwaayadaha ah** ee aad u isticmaasho liidhka, sida inaad samayso dhoobo ama quruurado, ama inaad ranjiyayso alaabta guriga. La hadal waaxda caafimaadka deegaankaaga wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan waxyaabaha aad ku samayso wakhtigaaga aad firaaqada leedahay ee ku jiri kara liidhka.
- **Alaabta lagu ciyaaro** iyo **alaabta guriga** ee qadiimiga ah waxaa dhici karta in lagu ranjiyeeyay liidh. Alaabta qadiimiga ah ee carruurtu ku ciyaarto iyo alaabaadka kale ee carruurta waxa ay kamid noqon karaan waxyaabaha leh liidhka.[4]
- Cuntada iyo dareeraha lagu kariyay ama lagu kaydiyay **liidhka kiristalka ah** ama **dhoobada laga sameeyo quruuradaha** waxaa dhici kara inay leeyihiin liidh.
- Dawooyinka qaar, sida "**greta**" iyo "**azarcon**," ee loo isticmaalo daawaynta caloosha.

---

[4] 1978, dawlada federalku waxa ay mamnuucday alaabaadka caruurtu ku ciyaarto, alaabaadka kale ee caruurta, iyo alaabta guriga ee la mariiyay ranjiga liidhka leh. 2008, dawlada federalku waxa ay mamnuucday liidhka in badanaa caruurta alaabta la mariyo. Dawlada federalku waxa ay wakhtigan mamnuucday liidhka inuu ka bato 100 ppm miisaabkiisu alaabaadka caruurta.

## Wixii Macluumaad Dheeraad ah

**Xarunta Qaranka ee Macluumaadka Liidhka**
Waxa aad barataa sida carruurta looga ilaaliyo sunta liidhka oo waxa aad ka heshaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyeelada liidhka Websaytka epa.gov/lead iyo hud.gov/lead, ama la hadal **1-800-424-LEAD (5323).**

**Khadka Tooska ah ee Amaanka Biyaha La Cabayo ee EPA**
Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan biyaha la cabayo, la hadal **1-800-426-4791**, ama booqo epa.gov/safewater wixii macluumaad dheeraad ah ee liidhka ku jira biyaha la cabayo.

**Khadka Taleefanka Tooska ah ee Gudida Badbaadada Alaabta Macmiilka (CPSC)**
Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan liidhka ku jira alaabta caruurtu ku ciyaaraan iyo alaabaadka macmiilka, ama si looga warbixiyo alaabta macmiilka ee aan amaanka ahayn ama dhaawac la xidhiidha alaabta, la hadal **1-800-638-2772**, ama booqo websaytka CPSC cpsc.gov ama saferproducts.gov.

**Hay'adaha Bay'ada  iyo Caafimaadka ee Gobolka iyo Deegaanka**
Gobolada, qabiilada, iyo magaalada qaar waxa ay leeyihiin shuruuc u gaar ah oo la xidhiidha ranjiga liidhka leh. Waxa aad ka eegtaa hay'adaha deegaanka si aad u aragto shuruucda khuseeya kuwaas. Badanaa hay'adaha waxa sidoo kale laga helaa macluumaadka ku saabsan shirkadaha yareeya liidhka ee aagaaga, iyo meelaha ay macquul tahay in laga helo kaalmada dhaqaale ee yaraynta waxyeelada liidhka. Waxa aad ka heshaa macluumaadka cinwaanka iyo taleefanka saxda ah ee cida lagala xidhiidhayo gobolkaaga ama deegaankaaga Websaytka epa.gov/lead, ama kala xidhiidh Xarunta Macluumaadka Liidhka Qaran **1-800-424-LEAD.**

Dadka hadalka ama maqalku ku adag yahay waxa ay isticmaali karaan mid ka mid ah lambarada taleefanka ee ku qoron buug-yarahan ee TTY iyada oo markaa kala hadlaya Adeegyada Curyaamiinta ee Federalka **1-800-877-8339**.

## Xafiiska Gobolka ee Hay’ada Ilaalinta Deegaanka Maraykanka (ERA)

Shaqada EPA waxa weeye in lagu ilaaliyo caafimaadka bini’aadanka iyo deegaanka. Xafiiska EPA ee Deegaanka waxa uu bixin karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruucda iyo barnaamijyada ilaalinta liidhka.

**Deegaanka 1** (Connecticut, Massachusetts, Maine, New Hampshire, Rhode Island, Vermont)

La Xidhiidh Liidhka Deegaanka
U.S. EPA Region 1
5 Post Office Square, Suite 100, OES 05-4
Boston, MA 02109-3912
(888) 372-7341

**Deegaanka 2** (New Jersey, New York, Puerto Rico, Virgin Islands)

La Xidhiidh Liidhka Deegaanka
U.S. EPA Region 2
2890 Woodbridge Avenue
Building 205, Mail Stop 225
Edison, NJ 08837-3679
(732) 906-6809

**Deegaanka 3** (Delaware, Maryland, Pennsylvania, Virginia, DC, West Virginia)

La Xidhiidh Liidhka Deegaanka
U.S. EPA Region 3
1650 Arch Street
Philadelphia, PA 19103
(215) 814-2088

**Deegaanka 4** (Alabama, Florida, Georgia, Kentucky, Mississippi, North Carolina, South Carolina, Tennessee)

La Xidhiidh Liidhka Deegaanka
U.S. EPA Region 4
AFC Tower, 12th Floor, Air, Pesticides & Toxics
61 Forsyth Street, SW
Atlanta, GA 30303
(404) 562-8998

**Deegaanka** (Illinois, Indiana, Michigan, Minnesota, Ohio, Wisconsin)

La Xidhiidh Liidhka Deegaanka
U.S. EPA Region 5 (LL-17J)
77 West Jackson Boulevard
Chicago, IL 60604-3666
(312) 353-3808

**Deegaanka 6** (Arkansas, Louisiana, New Mexico, Oklahoma, Texas, and 66 Tribes)

La Xidhiidh Liidhka Deegaanka
U.S. EPA Region 6
1445 Ross Avenue, 12th Floor
Dallas, TX 75202-2733
(214) 665-2704

**Deegaanka 7** (Iowa, Kansas, Missouri, Nebraska)

La Xidhiidh Liidhka Deegaanka
U.S. EPA Region 7
11201 Renner Blvd.
Lenexa, KS 66219
(800) 223-0425

**Deegaanka 8** (Colorado, Montana, North Dakota, South Dakota, Utah, Wyoming)

La Xidhiidh Liidhka Deegaanka
U.S. EPA Region 8
1595 Wynkoop St.
Denver, CO 80202
(303) 312-6966

**Deegaanka 9** (Arizona, California, Hawaii, Nevada)

La Xidhiidh Liidhka Deegaanka
U.S. EPA Region 9 (CMD-4-2)
75 Hawthorne Street
San Francisco, CA 94105
(415) 947-4280

**Deegaanka 10** (Alaska, Idaho, Oregon, Washington)

La Xidhiidh Liidhka Deegaanka
U.S. EPA Region 10 (20-C04)
Air and Toxics Enforcement Section
1200 Sixth Avenue, Suite 155
Seattle, WA 98101
(206) 553-1200

## Gudida Badbaadada Alaabta Macmiilka (CPSC)

CPSC waxa uu dadka ka ilaaliyaa khatarta dhaawaca bilaa sababta ah ee macmiilka taas oo markaa loo marayo waxbarasho, hawlaha heerarka badbaadada, iyo xoojinta. La xidhiidh CPSC ee macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan badbaadada iyo shuruucda alaabta macmiilka.

**CPSC**
4330 East West Highway
Bethesda, MD 20814-4421
1-800-638-2772
cpsc.gov ama saferproducts.gov

## Waaxda Maraykanka ee Hormarka Guryaynta iyo Magaalada(HUD)

Shaqada HUD waxaa weeye inay abuurto bulsho xoogan, joogto ah, oo loo dhan yahay iyo guryo tayo leh oo cid walbaaba awoodi karo. Kala xidhiidh Xafiiska HUD ee Xakameynta Lead Hazard iyo Guryo Caafimaad qaba wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Shuruucda Guryaynta ee Badbaadada Liidhka, taas oo markaa ilaalinaysa qoysaska degan guryaha la dhisay wixii ka horeeyay 1978 ee guryaha kaalmada, iyo xakamaynta waxyeelada liidhka iyo barnaamijka deeqda lacagta daraasada.

**HUD**
451 Seventh Street, SW, Room 8236
Washington, DC 20410-3000
(202) 402-7698
hud.gov/lead

Waraaqahan waxaa ay ku jiraan meel cid walba ka heli karto. Waxa ay shakhsiyaadka ama hay'ado badin karaan iyaga oo aan wax fasax ah dalban. Macluumaadka lagu bixiyay waraaqagan waxa uu ku salaysan yahay macluumaadka sayniska iyo farsamo ee wakhtigan ee arrimaha lagu soo bandhigay oo waxa ay muujinayaan xuduuda maamul ee uu sameeyay sahrciga maamulida ee hay'adaha dawlada. Kadib talada la bixiyay kadib maaha daruuri inuu bixiyo ilaalo dhamaystiran oo dhamaan xaalada ah ama waxyeelada caafimaadka oo dhan kaas oo markaa keeni kara in uu qofka soo gaadho liidhku.

U. S. EPA Washington DC 20460
U. S. CPSC Bethesda MD 20814
U. S. HUD Washington DC 20410

EPA-747-K-12-001
Maarso 2021

# MUHIIM!

## Liidhka Rinjiga Gacmaha, Dhaska iyo Ciida ee Gurigaaga ku Xeeran Waxa uu Noqon Karaa Khatar Hadii Aan Si Munaasab ah Loo Maamulin

- Caruurta kayar 6 sano jirka ayaa khatarta ugu badan ugu jira sunta liidhka ee gurigaaga.

- Liidhku waxa uu waxyeeli karaa caruurta yaryar iyo sabiyada kahor xataa inta ayna dhalan.

- Guryaha, dugsiyada, iyo xarumaha daryeelka ilmaha ee la dhisay wixii ka horeeya 1978 waxa ay u badan yihiin inay leeyihiin riji leh liidhka.

- Xataa caruurta u muuqda inay caafimaad qabaan waxa ay yeelan karaan heer khatar ah oo liidhka oo jidhkooda ah.

- Waxyeelaynta meelaha leh raniga leh liidhka ama in meesha laga saaro ranjiga liidhka leh in si munaasab ah looga tirtiro waxa uu kordhin karaan khatarta qoyska.

- Dadka waxaa ay yeelan karaan liidhka oo gala jidhkooda iyada oo markaa la neefsanaya ama la liqaya dhaska liidhka, ama iyaga oo cunaya ciida ama ranjiga leh liidhku.

- Dadku waxa ay leeyihiin ikhtiyaaro badan oo markaa ay ku yarayn karaan khatarta liidhka. Guud ahaan, ranjiga leh liidhka ee xaaladiisu wanaagsan tahay ma lahan waxyeelo (eeg bogga 10).